# XEERKA GUDDIGA 4.30.010-P

# Xeerka Anshaxa iyo Edbinta Ardayga

**Hordhac**

A. Degmada ayaa go'aamiso isticmaalka cadeynta ku saleysan, dhaqamada naxdinta xog ogaalka ah ee yareyso waqtiga waxbarashada ee arday walba iyo yareyso isticmaalka edbinta ka ceyrinta. Degmada waxay dooneysaa inay dhisto faham guud oo ku saabsan faafitaanka dhaawacyada iyo saameynta aqoonsataa in waayo aragnimada naxdinta ay si xun u saameyn karto dabeecada ardayga iyo in dhaqamada edbinta ay dib u naxdin gelinayo ardayda. Dugsi iyo barnaamij walba waa inay abuuraan jawi badqab leh, degan, oo ammaan ah taasoo ardaydoo dhan ay dareemaan in lagu daro, la taageero, oo la ixtiraamo. Si taas loo gaaro, go'aan gaarista edbinta waa inay ku jirtaa aragtida naxdinta xog ogaalka ah oo marka hore diirada la saaro dhaqamada soo celinta. Marka dabeecada ardayga at carqaladeyso jawiga waxbarashada ama shaqada, shaqaalaha dugsiga, qoysaska, iyo ardayda waxay wadaagayaan walaacyada oo waxay si wadajir ah uga shaqeynayaan inay u hormariyaan oo u hirgeliyaan qorshooyin loo siman yahay oo soo celin ah ee loogu tallogalay waxqabadyo iyo taageerooyin dheeraad ah oo degdeg ah

Degmada waxay aaminsantahay in kuwa xiggo ay yareyneyso baahida tallaabooyinka edbinta ee ka reebta ardayda fasalkooda:

1. Jawiga dugsiga wanaagsan
2. Filashooyinka dabeecada ardayga oo cad isna waafaqsan
3. Xeeladaha maareynta naxdinta xog ogaalka ah iyo fasalka wax ku ool ah
4. Ka qeybgalka waalidka/qoyska/masuulka
5. Waxbarashada quseyso dhaqanka
6. Dhaqamada hormar ahaan ku haboon

B. Edbinta waa in loo isticmaalaa in lagu taageero ardayda waxbarashada xirfadaha iyo aragtiyada muhiimka u ah in la xoojiyo jawiga dugsiga wanaagsan laga fogaado dabeecada carqaladeynta. Isticmaalka qaabka naxinta xog ogaalka ah ee edbinta dugsiga oo ay wehliso waxbarasho iyo tilmaamo macno leh oo la heli karo ayaa siiso ardayda fursada ay wax uga bartaan qaladaadkooda oo ay wax ugu biiriyaan bulshada dugsiga. Tan waxay u badantahay inay keento in ardayga dib loogu soo celiyo waxbarashada. Degmada waxaa ka go'an inay u diyaariso ardayda inay ku guuleystaan nolosha iyadoo siineyso jawi dugsi badqab leh, taageero leh, oo loo dhanyahay kaasoo:

- Waxtar u leh waxbarashada ardayda
- Kobciso isku kalsoonaanta
- Dhiirogeliso ka qeybgalka firfircoon ee bulshadooda

Kormeeraha guud ama wakiilka ayaa la shaqeynayo dugsiyada iyo barnaamijyadoo dhan si ay u fuliyaan dhaqamaha cadeynta ku saleysan, dhaqamada naxdinta xog ogaalka ah iyo xeeladaha lagu joogteynayo jawi dugsi badqab leh, degan, oo ammaan ah. Xeeladaha waa inay diirada saaraan:

- Xiriirinta filashooyinka dabeecad cad, ku haboon, oo joogta ah
- Barida ardayda filashooyinka dabeecada
- Siinta ardayda waxqabadyada/taageerooyinka heerka sare
- Hirgelinta isticmaal is waafaqsan oo cadaalad ah ee cawaaqiibaha

- Baabi'inta isticmaalada aan dheelitirneyn ee tallaabooyinka
- Dib u eegista joogtada ah iyo hagaajinta dhaqamada edbinta
- Kobcinta isticmaalka macalimiinta ee xeeladaha maareynta naxdinta xog ogaalka ah iyo fasal waxtar leh

Degmada waxay aqoonsantahay in ardayda qaarkood ay la kulmaan tallaabooyinka edbinta aan dheellitirneyn oo lagaga jawaabo dabeecadooda, gaar ahaan ardaydaku abtirsada Laatiinka, ardayda Afrikaanka Ameerikaanka ah ama Madowga, Dhaladka Mareykanka, iyo Jasiiradaha Baasifiga, Bartayaasha Luuqada Ingiriiska, ardayda naafada ah, ardayda LGBTQ ee Joogtada ah, iyo ardayda ku nool saboolnimada. Degmada waxay aqoonsantahay in eexashada miyir la'aanta ah ay saameyn karto go'aan gaarista edbinta oo raadiso baabi'inta farqiga u dhexeeya isticmaalka dugsiga iyo barnaamijka edbinta. Sida lagu sheegay Xeerka Sinnaanta Waxbarashada Jinsiyada degmadeena (2.10.010-P), Dugsiyada Dadweynaha Portland waxaa ka go'an guusha arday walba oo Degmadeena ah. Dugsiyada iyo barnaamijyada waa inay ku dadaalaan inay si cadaalad ah u dhaqan geliyaan, oo simman, oo aan takoor iyo eex laheyn sharciyada edbinta.

C. Iyadoo la aqoonsanayo in dhaqamada edbinta ardayga ay si dhow ula xiriiraan guusha ardayga, Degmada waxay filaysaa in dugsiyada ay ku dhaqmaan in:

1. Isku darida aragtida ardayga iyo qoyska oo heerarkoo dhan ah laga bilaabo xeerka lagu dhaqangelinayo, oo looga qeybgelinayo waaladiinta/masuulada xili hore oo nidaamyada edbinta;
2. Miyaa naxinta xog ogaalka ah iyo cadeynta ku saleysan, oo keento in dugsiyada ammaanka ah oo ku saleysan sinnaanta, hormarinta guusha ardayga, hormarinta ka qeybgalka ardayga, oo kobciya dareenka ardayga ee isku kalsoonaanta;
3. Bixi waxqabadyo is waafaqsan, cadaalad, iyo loo simman yahay iyo cawaaqiibaha dugsiyadoo dhan iyo barnaamijyada degmada;
4. Baabi'i kala duwanaanshaha lagu isticmaalo edbin adoo xubinayo waxqabadyada ku xiran sinnaanta iyo cawaaqiibaha dhammaan jinsiyadaha iyo kooxaha qowmiyada, oo jinsi ahaan, ka mid ah kuwa leh kala duwanaanshaha iyo fasalada kale ee illaalsan (arag 1.80.020-P Takoor La'aanta);
5. Qeex oo sheeg filashooyinka dabeecada ardayga;
6. Qeex oo sheeg filashooyinka masuuliyadaha shaqaalaha ee la xiriiro anshaxa iyo edbinta ardayga;
7. Isticmaal dhaqamada soo celinta ee lagu dheelitiro baahiyaha ardayga, baahiyaha kuwa ay sida tooska ah u saameyso dabeecada ardayga, iyo baahiyaha guud ahaan bulshada dugsiga;
8. U fududeeyo ardayda, shaqaalaha, waaladiinta/masuulada iyo bulshada inay si wadajir ah uga shaqeeyaan sidii ardayda loo siin lahaa ardayda labadaba taageerada tacliinta iyo aan tacliinta aheyn.

D. Maadaama aan dhammaanteen ku howlannahay guusha carruurteena, waa masuuliyada ay ku wadaagaan dhammaan dadka weyn dugsiga degmadeena si loo hubiyo in mabaadi'da cadaalada bulshada ay ku jiraan dugsiyadeena iyo inaan qaadno tallaabooyinka lagama maarmaanka ah ee lagu badelo nidaamkeena si ay u daboolaan baahiyaha ardayda. Masuuliyadahaan waxaa ka mid noqonayo indho indheynta, qirashada eexashooyinka miyir la'aanta ah, rabitaanka lagu barto dhaqamada soo celinta iyo naxdinta xog ogaalka ah.

Hogaaminta degmada waxaa laga filayaa inay bixiso hormarinta xirfadeed si ay u taageerto isbedeladaan, oo ay u qeexdo habraacyada iyo dhaqamada dhiso jawi badqab ah, taageero leh, oo loo dhanyahaya. Qof walba ee ku jiro dugsiga oo xiriir toos ah la leh ardayda laga filayo inay isticmaalaan fursadaha waxbarashada ee loo bixiyay inay abuurto oo joogteyso jawi dhiirogeliyo waxbarashada ardayda iyadoo la isticmaalayo mabaadi'da taageerada dabeecada wanaagsan, dhaqan ahaan ka jawaabo, iyo dhaqamada edbinta waxtarka leh ee naxdinta xog ogaalka ah ee lagu taageero hormarinta dabeecada bulshada ardayga.

**Mabaadi'da Edbinta**

A. Edbinta waa inay ahaataa jawaab simman, daah furan, waqtiyeysan, cadaalad ah, oo hormar ahaan ku haboon sida ku saleysan baahiyaha ardayga gaarka ah sida lagu qeexay ORS 339.250.
B. Dhaqamada edbinta waa inay joojiyaan dabeecada aan loo baahneyn ka hor intaysan dhicin, oo ay isticmaalaan waxqabadyada wax tarka leh kadib markii ay dhacaan, iyagoo raadinaya xalinta waxyeelo walboo ay keentay.

C. Degmada iyo dugsiyada waa inay sameeyaan dadaal walboo macquul ah oo marka koowaad lagu saxayo dabeecada ardayga ee aan loo baahneyn iyadoo loo marayo qoyska, dugsiga, iyo illaha bulshada ku saleysan. Dadaaladaan waxay ku lug leeyihiin isticmaalka aragtida naxdinta xog ogaalka ah si loo falanqeeyo baahiyaha ardayga gaarka ah iyo jawaabaha qofka weyn, iyadoo la sameynayo waxqabadyada ka hortaga, jawaab celinta, iyo hormar ahaan ku haboon oo siineyso badelada edbinta iyo waxbarashada.

D. Edbinta waa inay tixgelisaa saameynada la fahmay ee naxdinta maskaxda hormareyso iyo bilaabida heerka suurtogalka ah ee ugu hooseeyo ee lagu go'aansaday inay badesho dabeecada ardayga oo ay yareyso qasaaraha waqtiga waxbarashada. Waa filashada in matalaadaha Degmada ay tixgeliso culeyska naxdinta ardayga shaqsiga ah markii laga hadlayo edbinta. Illaa ay ka jiraato dabeecada u keento qatar dhow dadka kale, edbinta ka saarida waa inay noqotaa tallaabada ugu dambeyso.

**Kormeerida iyo La xisaabtanka**

A. Kormeeraha guud waa inuu ku aasaasaa qaab dhismeed heerka Degmada iyo dugsiga si loo kormeero hormarka anshaxa ardayga, oo ay ku jiraan wargelinta sannadlaha ee Degmada.

B. Degmada waa inay u kormeertaa hormarka anshaxa ardayga qaab ku saabsan xog oo ka jawaabeyso baahiyaha dugsiga iyo ardayda.

C. Qaab dhismeedka kormeerka waa in lagu xiraa Qorshooyinka Hormarinta Dugsiga iyo Degmada oo waxaa loo naqshadeeyay inay aqoonsato aagaga baahida, bartilmaameedato aagaga heerka taageerada, taaso u suurtogelineyso dugsiyada iyo Degmada inay sameeyaan xalal.

D. Warbixinta kormeerida waa in lagu soo bandhigaa qaab daah furan oo ay heli karaan maamulayaasha, macalimiinta, iyo dadweynaha guud sida sharciga ogolaanayo (OAR 581-021- 0330, OAR 581-021-0340). Kormeerka socda waa in loo istcimaalaa si loo hubiyo in dhaqamada simman ee dugsiga ku saleysan loo hirgeliyaa qaab cadaalad ah, aan takoor laheyn, iyo dhaqan ahaan ka jawaabo.

**Hirgelinta**

A. Kormeeraha guud waa inuu sameeyaa jihooyinka maamulka, habraacyada iyo/ama heerarka lagu higelinayo xeerkaan.

B. Degmada waa inay daabacdaa oo ay u qeybisaa filashooyinka shaqaalaha, ardayda iyo waaladiinta taasoo tilmaameyso xaquuqaha ardayga iyo masuuliyada, filashooyinka dabeecadaha, waxqabadyada heerka sare iyo tallaabooyinka edbinta imaan karto.

C. Sida waafaqsan xeerkaan, illo ayaa loo qoondeynayaa oo lagu taageero qaabka naxdinta xog ogaalka ah ee edinta, dabeecad fiican oo la siiyo badelada edbinta ka

saarida.

**Qeexitaano**

- Dhaqamada Soo celinta: Shaqaalaha degmadu waa inay ku dedaalaan inay isticmaalaan hagaajinta xidhiidhada marka ay munaasibka tahay waana inay ku heshiiyaan dhamaan dhinacyadu. Hagaajinta xidhiidhada waxa ka mida, laakiin kuma xadidna oo kaliya:
  - Shirarka Soo Celinta: kulan u dhexmara dhammaan dhinacyada ay saameysay, ka qeybgalayaasha waxaa ka mid ah maamulayaasha dugsiga, macalimiinta, shaqaalaha, ardayda, waaladiinta/masuulada, iyo bixiyayaasha adeega bulshada ee ku haboon si looga wada hadlo saameynta dabeecada, u xalinta qilaafaadka si nabad ah, iyo sameynta qorshaha tallaabada oo waxqabadyada iyo taageerooyinka.
  - Isu-imaatinka Xallinta Khilaafka: isku-imaatin loogu talagalay in boos lagu siiyo ardayda sida tooska ah ugu lug leh khilaaf iyo kuwa kale ee uu sida tooska ah u saameeyay si looga hadlo saameynta habdhaqanka loona dajiyo qorshe lagu hagaajinayo waxyeellada.
  - Heshiiska Xallinta Khilaafka: natiijada isu-imaatinka kor lagu sharaxay, ee looga baahan yahay ardaydu inay sameeyaan magdhawyo buuxinaya baahiyaha dadka ay saameysay.
- Taageerooyinka Heerarka: qeybta ugu muhiimsan ee xogta ku saleysan qaabdhismeedka Nidaamyada taageerada Heerarka badan (MTSS). Fiiro gaar ah ayaa diirada saarto Heerka Tier 1 (dhaqamada caalamiga ah iyo taageerada ardayda oo dhan), Heerka 2 (xeeladaha kooxda yar ee la bartilmaameedsaday iyo taageerooyinka la bixiyo markii lagu daro Heerka 1) iyo Heerka 3 (taageerada heerka ardayga gaarka ah).
- Isku Filnaanshaha: aaminaada ardayda ee awoodooda dabeecada ee lagu dajiyo laguna gaaro guulaha.
- Mabaadida Cadaalada Bulshada: qiyamyada door bida tallaabooyinka loogu tallogalay in lagu dhimo ama lagu baabi'iyo sinnaan la'aanta; sare u qaadida ka qeybgalka kala duwanaanshaha; iyo in la sameeyo jawiyo taageero u leh dadkoo dhan.
- Qaabka Naxdinta Xog ogaalka ah: ee loo naqshadeeyay inay ahaato jawaabta bulshada ee lagu taageero ardayda naxdinta qabta iyo qoysaskooda. Tan waxaa ka mid ah siyaasadaha iyo dhaqamada abuura jawi dugsi iyo barasho xirfadeed oo badbaado leh oo ku saabsan astaamaha iyo calaamadaha dhaawacyada, kor u qaadida adkeysiga iyo fayo-qabka ardayda, qoysaskooda, iyo shaqaalaha, waxanay yareeyaan dib u dhalinta uur-ku-taalada.

Tixraacyada Sharciga: ORS 339.240, ORS 339.250, ORS 659.850, OAR 581-021-0045, OAR 581-021-0050 illaa -0075.

Taariikhda: Waxay badeshaa 4.30.010-P (Heerarka Anshaxa) iyo 4.30.020-AD (Falsafada Edbinta) Waxaa la qaatay 6/2009; La badelay 4/2022

**Dib u eegida Xeerka**
Xeerkaan waxaa dib loo eegayaa 5 sanno ee walba. Waxay dib u eegtaa 4.30.010-P oo waxay meesha ka saartaa 4.30.030-P Barnaamijka loogu tallogalay Ardayda Carqalada, sidoo kale sida Jiheynta Maamulka 4.30.031-AD ee iyada wehliyo.